



# Muhaajiriinta aan Sharciga Lahayni ma ku Guursan Karaan Minnesota


Can Undocumented Immigrants Marry in Minnesota?

## Kuma lehi wadanka Sharci, ma ku guursan karaa qof Minnesota?

Cid walba oo joogta wadanka United States waxay leeyahay xaq ah inay guuran karto. Taasi waa run sharcigaaga wadanku waxa uu rabo ha noqdee. Laakiin, ku guursiga wadanka US ama guursiga qof muwaadin Mareykan ah (US) ah KAAMA ilaalinayso adiga masaafurin.

## Ka wadan hadii aanan haysan lambarka soosha sakuuratiga?

Gobolka Minnesota codsiyada warqada nikaaxa waxa ay leedahay meel lagu buuxiyo lambarka soosha sakuuratiga. Haddii aadan haysan lambarka soosha sakuuratiga, wali aad codsan kartaa laakiin waa inaad ku dhaarataa inaad haysan mid. Waxaa jira meel lagu sameeyo arrinan oo ka mid ah foomka codsiga.



## Maxaa ka dhiga guur mid sharci ah?

Si aad si sharci ah ugu guursato Minnesota waxa inaad codsataa warqada nikaaxa uuna meherka sameeyo qof loo ogol yahay inuu sameyn karo. Kolka waxyaabaha la sameeyo waxa aad heli warqada nikaaxa.

## Ma heli warqad nikaax?

Gobolka Minnesota, waa khasab inaad 18-sanno jir tahay aadna awoodo inaad adigu go'aanadaada gaari karto haddii aad rabto inaad guursato.

**Ogow:** Minnesota ma aqoonsato guurarka dadka aan qaan gaarka ahayn ee gobolka kale ugu safra si ay u soo guursadaan.

## Guur caynkee ah ayaan laga ogolayn gobolka Minnesota?

- Haddii aad doonayso inaad guursato, qofka kale isuma qabi kartaan kolkaa.
- Haddii hadda ka hor aad guursatay, waa khasab inaad qofkii hore si **sharci** ah aad isu furteen. Furiinka sharciga ahi waa kan u hogaansama sharciyada furiinka ee gobolka ama degmada uu furiinku ka dhacay. Gobolka Minnesota, furiinka waa khasab inuu maro nidaam maxkamadeed waxa uuna u baahan yahay in amar maxkamadeed uu saxiixo xaakim lagana xareeyo amarkaa maxkamada ka hor inta furiinku uusan noqon mid sharciyaysan.

- Minnesota uma ogolaato qaar ka mid ah dadka ehelka aadka isugu dhawi ahi inay is guursadaan. Ma guursan kartid:
  - Ilmaha aad adigu dhashay ama soo korsatay.
  - Ilmaha aad awoowaha ama ayeeyada u tahay ama ilmahaagu ay soo korsadeen.
  - Walaalkaa ama walaashaa.
  - Ilmaha aad adeerka ama eedada u tahay hadii ay jirto riximnimo
  - Ilma adeerada koowaad. Ilma adeerada koowaad waa ilmaha eedadaa ama adeerkaa dhalo ee aad riximka tihiin.



Wixii akhbaar ah ee kale ee ku saabsan warqada nikaaxa ama xaflada meherka, fadlan ka eeg warqadayada xogta aruursan ee [Guurka Minnesota](#).

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambaysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2023 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.